

WAKHTIGA KA HOR INTA CANUGA UUSAN KU BIIRIN DUGSIGA XANAANADA

Xirfadaha la xiriira adeegsiga Suuliga



Suuliga wuxuu noqon karaa mowduuc ku adag qoysaska leh carruurta yaryar. Ilmo kastaa waxa uu si madax banaan ugu dhaqaaqayaa dhanka isticmaalka musqulaha isaga oo ku socda xawli gaar uu ah. Qoyskaagu waxa uu samayn karaa waxa ugu fiican marka uu ka shaqaynayo himilada ilmahaaga ee ah in ay iskood u isticmaalaan musqusha. Marka carruurta u gudbaan dugsiga xanaanada, macalimiinta iyo shaqaaluhu waxay diyaar u yihiin inay kula kulmaan carruurta halka ay joogaan. Tan waxaa qayb ka ah musqulaha!

Marka ay joogan dugsiga, carruurta waxay isku dayi doonaan inay si iskood ah u isticmaalaan musqusha. Dhib malaha haddii ilmahaagu si buuxda ugu tababaran yahay isticmaalka musqusha, waxaa jira qaybo ka mid ah adeegsiga musqusha oo ay bilaabi karaan inay si iskood ah u sameeyaan. Dulmar liiska hubinta adiga iyo ilmahaaga. Ku celceli adeegsiga xirfadaha uusan ilmahaagu weli samayn karin.



Haa	Xirfada Adeegsiga sida Madaxa Banaan ee Suuliga
	Waan u sheegi karaa qofka weyn markaan u baahdo inaan isticmaalo suuliga
	Surwaalka waan iska siibi karaa waanna xiran karaa markaan suuliga isticmaalo.
	Haddii aan kaadinaayo, surwaalka waan iska siibi karaa ilaa heerka aan kaga isticmaali karo musqusha aniga oo aan qaawin jirkayga hoose
	Waan isticmaali karaa warqada musqusha si aan isugu tirtiro.
	Waan nadiifin karaa musqusha.
	Gacmahayga waan dhaqi karaa

Loogu talagalay dadka Waa weyn ee Waalidiinta ah

Waxyaabaha Tixgelinta uu baahan marka ay Carruurta uu Gudbaayan dugsiga Xanaanada

- U xir ilmahaaga dhar ay u fududahay inay iska siiban amaba ay xirtan.
- La wadaag baahiyaha musqulaha ilmahaaga macalinkooda. Macallimiintu waxay ka caawin karaan ilmahaaga inuu dejiyo oo uu gaaro yoolalkiisa marka uu isticmaalayo musqusha dugsiga.
- Waxaad nigisyo dheeri ah iyo qaybo dhar ah aad gelisaa boorsada dhabarka ee ilmahaaga haddii ay shilal dhacaan.
- Haddii ilmahaagu qabo baahiyo caafimaad oo la xiriira musqusha, la hadal bixiyaha xanaanada caafimaadka ilmahaaga ama khabiirka. Waxay buuxin karaan foomamka si ay uga caawiyaan dugsiyada inay abuuraan qorshe wax looga qabanayo baahiyahan.

Talooyin ku saabsan Tababarka Musqusha

- Ammaan ilmahaaga marka ay isku dayaan inay musqusha isticmaalaan, xataa haddii ay shil galaan. Markaad tan sameyso, kama welweli doonaan habka.
- Qorshe samee. Cunugaagu ha isku dayo inuu isticmaalo musqusha markay soo toosaan subaxii iyo hurdo fudud kadib, ka hor inta aadan gurigaaga ka tagin, ka hor inta aanay seexan iyo wakhtiga jifka, iyo ka hor cuntada.
- Isticmaal [ilahan laga helay JCPS Carruurnimada Hore](#) si aad wax badan uga ogaato tababarka musqusha. Waxa qayb ka ah jaantus lagu ogaanayo wakhtiyada uu ilmahaagu ku guulaysto qayb ka mid ah tababarka musqusha.